Aragtida mustaqbalka ee Borås

SOMALISKA

Sawir-naqshadeeye: Ida Brogren
Soo saare: Xafiiska maamulka magaalada Xariirka, 2021

Aragtida mustaqbalka ee Borås

Borås waa magaalo iyo baadiyo, taariikh ahaan, cas-rigaan iyo mustaqbalka.

Annaga ku nool, ka shaqaynaaya kuna kulansan magaalada Borås waxaanu leennahay awood gaar ah oo aanu wax ku wada qabsan karno. Wadashaqaynta ka dhaxaysa dadka degaanka, degmada, ganacsiga, tacliinta iyo bulshada rayidka ah waxay ka muuqataa aragtida oo dhan waxayna ka dhigeysaa mid gaar ah. Si wadajir ah ayaanu u soo saarnay aragtidaan, waxaana ugu dhabeyn karnaa awoodo wadajir ah, annaga oo dhan iyo jiilasha mustaqbalka awgood.

Tani waa aragtida mustaqbalka ee Borås.

QAYBAHA ARAGTIDA

Daryeelid midba midka kale iyo deegaanka

Borås, waxaan isa saarnaa xil iyadoo aan ula dhaqmayno midba midka kale iyo deegaankeenna si daryeel kujirto. Waxaan si isku dubo dhacsan kula noolnahay bay'ad qani ah, aduunkeenna nagu hareereysan iyo dadka kale. Bulshada, dhaqaalaha, noolaha iyo degaanka raagaya ayaa saldhig u ah doorashadeenna iyo go'aanadeenna.

In dadka Borås ay kala duwan yihiin waa awood. Isla markaana dhammaan waxay leeyihiin fursado siman. Iyadoo aan loo eegin da'da iyo xaaladda-nololeed ayaa waxay dadka degaanka helaan taageero si ay ugu noolaadaan nolol qani ah. Dhammaan dadka Borås waa muhiim, waxaana ka qayb qaadan karaan sida bulshadeenna loo horumarinaaya. Waxaan iska wada qaadaynaa mas'uuliyad wadareed annagoo isu muujineyna kalsooni isuguna yeereyno wadahadal.

Waxaan si wadajir ah u qaadanaynaa mas'uuliyadda bay'adda iyadoo dib loo isticmaalayo, dibna loo warshadeynaayo, maareynaayana ilaha tamarta iyo kheyraadka dabiiciga ah hab raagitaan ku dheehantahay. Dhammaanteen waxaan leennahay fahanka ah isku xidhnaanta ka dhaxaysa dhinacyada sida magaalada, baadiiyaha, dadka, bay'adda iyo aduunka nagu hareereysan. Gudaha way fududahay in lagu dhaqdhaqaaqo gaadiidka dadweynaha, lugta iyo baaskiilka, laakiin xitaa safarrada dhaadheer waxaan samayn karnaa qaab cimilada u roon.

Borås aamin ah oo bilicsan

Borås way bilicsantahay waana meel aamin ah. Annaga ku nool, ka shaqeeya kuna kulmo halkaan waxaa noo dhow waxa aan nololmaalmeedkeena u baahannahay.

Taallada-farshaxannada iyo farshaxannada jidadka waxay ka bixinayaan muuqaal kore oo xiise leh waxaana bixinayaan soo jiidasho caalami ah. Deegaan nadiif ah oona bilicsan ee goobaha aan wada wadaagno ah waxay abuurayaan farxad, waxayna bixinayaan xasilooni.

Waxaan si wadajir ah u jaangoyneynaa meelaha ay ka dhisanyihiin guryaha la deganyahay, waxaaana Borås oo dhan ka jira guryo ku habboon xaaladaha nololeed ee kala duwan iyo da'aha kala duwan. Halkaan waxaa jira adeeg, dhaqdhaqaaqyada waqtiga firaaqada, dhaqanno, shirkado iyo u dhowaanshaha meelaha bay'adda halkaa oo ay dadka deganyihiin kana shaqeeyaan.

Fursado iyo dhiiranaan in la hormaro

Magaalada Borås, waxaan nahay hal-abuurayaal lehna geesinnimo aan ku fikirno kuna dhaqaaqno dhabbooyin cusub. Halkaan way fududahay in la xaqiijiyo fikradaha iyo riyooyinka.

Waxbarasho tayo sare leh oo laga bilaabo iskuulka xanaanada ilaa jaamacad ayaa dadka iyo bulshada kor u qaada. Iyadoo ay is kaashanayaan degmada, jaamacadaha, ganacsiyada iyo bulshada rayidka ayaa waxaa jirta waxbarasho soo jiidasho leh oo heer walba ah. Fursado wanaagsan oo waxbarasho ayaa dadka Borås siinaya fursad ay ku hormaraan oo ay wax ku bartaan noolashooda dhan.

Horumarka Borås wuxuu ku salaysanyahay dhaxal laga dhaxlay dhar-samaynta iyo ganacsiga. Waxaan taagannahay heerka ugu sarreeysa ee tiknoolajiyadda deegaanka, IT-ga iyo dhijitaalaynta, waxaana ku dhiiranaynaa maalgashiga meelo cusub. Baaxadda laamaha xirfadaha iyo ruuxda-ganacsi ee xooggan ayaa abuuraya fursadda looga faa'iideysan karo aqoonta halkaan taalo iyo horumarinta shaqsiyeed.

Dad baa ku kulmo Borås

Magaalada Borås, waxaa jira goobo badan oo loogu talo galay dadka in ay ku kulmaan inta badan saacadaha maalintii. Magaalada Borås, waxaan ku kulannaa si maalinla ah, xaflado, si kedis ah ama qorsheysan.

Goobaha badan ee lagu kulmo waa qololkeenna fadhiga ee dadweynaha u dhaxeeya ee ku yaala magaalada, baadiiyaha iyo qaab dijital ah. Halkaan waxaa yaala fursado aad si fudud ku dareemeysid dhaqamo kala duwan, bay'adeenna wanaagsan, ciyaaridda iyo la kulmidda dadka kale.

Kulamada waawayn iyo munaasabadaha, qaar badan oo caalamka soo jiitay, ayaa Borås saaray khariidada magaalooyinka kulamada iyo munaasabadaha.

Magaalada Borås, kulamadu waa hab loo noolaado.

Aragtida mustaqbalka ee Borås waa afar qayb oo aragti ah:

- Daryeelid midba midka kale iyo degaanka
- Borås aamin ah oo bilicsan
- Fursado iyo dhiiranaan in la hormaro
- Dad baa ku kulmo Borås

Aragtidaan waxaa ansaxiyay golaha degaanka ee magaalada Borås waxaana leh dhammaan dadka degan, ku nool kana shaqeeya magaalada Borås.

boras.se/vision

BORÅS STAD

XAFIISKA MAAMULKA MAGAALADA

Cinwaanka boostada 501 80 Borås **Cinwaanka booqashada** Kungsgatan 55
Telefoon 033-35 70 00 (växel) **E-maylka** boras.stad@boras.se
Bogga internetka boras.se